Waxbarashada warshedaha.

Madoonaysaa in aad baratid sida wax loosameeyo, laga bilaabo hindisid ilaa iyo waxsoosaar inta uu sheygu samaysmayo?
Ma doonaysaa in aad ku shaqeysid qalab daatooyin oo aad u sareeya?
Ma doonaysaa in aad dad kale aad lashaqeysid, ku waas oo iyaguna ku takhasuusay wax barashadaada?
Ma doonaysaa in aad ka shaqeysid shaqooyin caalami ah oo gaar ah?
Ma doonaysaa in aad shaqeysid inta aad ku jira wax barashada dugsiga sare?
Haddaba waxbarashadan warshadaha,wax tar balaadhan ayey ku lahaan doontaa.

Wax barashada warshadaha waxaad ka barankartaa aqoon aad u balaadhan, oo ku saleysan qebaha warshadaha ka mid ah, kuwaas oo marwalbana isbedela.
Wakhti aad u yar ayaa shaqooyinka laga shaqeeyo warshadaha isbedelo ka la duwani ku yimaadeen, ku waas oo ay mar walbana ay soo baxaan warshado cusub oo casri ah iyo habbab casri farsamadeed oo cusub.Waxaad baran doon taa daatooyinka-farsamda warbaahinta, iyo noocyada shayga uu kasameysanyaha iyo qalabada.

Waxaad kale oo aad ka fikirtaa waxa la is weydiiyo maanta ama laga hadlo ee xiisa ha leh, kaas oo ay suurto gal ay noqonkarto in la sameeyo, islamarkaana dib loo istic maali karo.

Waxbarashada warshaduhu waa mid caalami ah.Haddaba haddii aad xiisayneysid waxbrashada warshadaha waa in aad xiiso iyo garasho aad u heysid dhaqamada kaladuwan ee kale. Waxaa kale oo wanaagsan in aad taqaan luqado kale. Waxbarshada warshadaha waxaad ku sii xoojinkartaa luqadaada.

In aad shaqeysid ama aad waxbarshadaada aad sii wadatid.

Haddi aad dooratid waxbarshada warshadaha,shaqo waad raadsankartaa kadib marka aad dhameysid waxbarshada dugsiga sare. Shaqooyinka aad raadsankartidna waxa ay ku xidhantaha hadba waxbarshada aad kabaxday wax aytahay.Waxaa laga yaabaa in aad u baahnaatid aqoon xirfadeed sanad ama sanado dheeraad ah. Waxa suurto galnoqon karta in aad qadatid lacgta aqoon kororsiga, markaana uu ku hogaamindoono qof kashaqeeya warshad, halkaasna aad aqoon iyaga ka helidoontid. Dadkaasi waxa ay leeyihiin aqoon aad u saraysa, islamarkaana waxbadan ayey ka shaqeynayeen farsamadaas.

Haddii aad dooneysid waad sii wadan kartaa waxbarashadaada kadib marka aad dhameysatid waxabarshada dugsiga sare. Waxaad tusaale ahaan aad sameenkartaa in aad waxbarosho aad ka dalban kartid kuliyadaha farsamada. Ama waxaad kaloo aad sameenkartaa in aad waxbarashadaada aad ka dhigatid jamacadaha ama jamacadaha farsamada.
Waxaad laxidhiidhikaraysaa qofka ka masuul ah waxbarashada dugsiyada, qofkaas oo aad waydiinkartid dugsiga sare ee aad waxbarosho sare oo buuxda aad ka heli kartid, kaas oo markaa kuu sahli kara in aad tacliintaada markaa aad dhameysatid dugsuga sare aad siiwadan kartid waxbarasho sare.

Shaqooyinka aad helikareysid.

Marka aad dhameysid waxbarshada warshadaha, waxa aad tu saale ahaan aad ka shaqeynkartaa sida hawlwadeenka mashiinada,farsamooyinka ama teknikada caalamiga ah, iyo cilmiga iskugujira sida makaanikada iyo daatada iyo eliktroonikada ee loogu magacdaray (mekatroniker), farsamada teknikada casriga, farshaxanka dawaarka ama harqaanka tolitaanka (mönsterkonstruktör), hawl-wadeen shaqo (processoperatör), laxaamadle caalami ah

(internationell svetsare), farsamo yaqanka looxyada ama alwaaxda (trätekniker), farsamoyaqaanka isku dubarida dhismooyinka, iyo farsamoyaqaanka dhagaxyada (underhållstekniker eller stentekniker).

Qorshaha waxbarashadu waxa uu ka koobanyahay.
Farsamada warshadahu waxa uu ka kooban yahay casharo. Casharadaas oo ay dhaman ay ku tahay qasab ardayda dhiganaysa waxbarshada dugsigasare. Laakin waxaa jira casharo kale oo gaar u ah waxbarshadan warshadaha oo kaliya. Waxaa kaloo intaas dheer in ay jiraan casharo kale oo aad adugu gaar ahaan u doorankartid.

Majiraan waxbarasho u gaar ah dhamaan iskuulada farsamda gacanta ama warshadaha. iskuulkasta waxa uu leeyahay waxbarasho ugaar ah, ku waas oo ku wajahan warshadaha,ee markaa jira agagaarkiisa. Tusaalo ahan hadeynu u sooqadano waxaakamid ah sida waxbarashada warshadaha isku darka kiimikalka, warshadaha warqadaha, warshadaha biraha,warshadaha dharka,warshadaha qoryaha,warshadaha dhagaxaanta,ama farsamada geerashayada.

Waxaa lagayaabaa in ay dhacdo inaad ka weydid, meesha aad degentahay waxbarashada aad dooneysid in aad dhigatid.Waxaad kalaxidhiidhikartaa qofka ka masuulka ah waxbarshada dugsiyada iyo kuwa farsamda gacanta haddii aad meelkale aad dooneysid in aad kadhigankartid.
Waxaana suurto gal ah in lagu qaato oo ad heshid fursadaas.

Xidhiidhka suuqa shaqada.
Marka aad kujirtid waxbarashada dugsiga sare ee warshadaha iyo farsamada gacanta, waxa aad xidhiidh la leedahay suuqa shaqada.Waxa aad leedahay oo aad sameendoontaa 15isbuuc oo kujirta waxbarshadaada in aad goobo shaqo aad tagtid oo aad tababar xirfadeed iyo aqoonkororsi ku sameysid(APU). Qorshahaasna waxaa kuu dejindoona iskuulkaaga, isagoo la kaashandoona shirkadaha ama goobaha laga shaqeeyo ee u dhow meesha aad degentahay.
Waxbarshada farsamada gacanta ama warshaduhu waxa ay had iyo jeer ay lasocdaan warshadaha kuyala meesha aad degentahay,waxaanad arki doontaa sida runta ah ee ku wajahan waxbarshada aad ka dhiganeysid iskuulka aad kujirtid. Muddadaa gaaban ee aad u joogtid tababar waxbarashadeed shaqo waxa aad ka baranaysaa kanafaa ideysaneysaa dad, islamarkaana waxaad yeelanaysaa xidhiidh, xidhiidhadaas oo aad mustaqbalka aad u adeegsanaysid mark aad shaqooyin aad doonanaysid in aad doonatid. Haddii aad dooneysid in aad dalkale oo shisheeye kasameeysid tababar shaqo way suur toobi kareysaa in aad heshid fursadaas

Mustaqbalka iyo shaqooyinka
Maanta majiraan shaqooyin farabadan oo laga shaqeeyo warshadaha marka loo eego sanadihii hore ee ina soo dhaafay. Waxaana u sababa noqonkarta taas maanta wax walba waxa aykushaqeeyaan, wadana waa daatooyin iyo mashiino.
Waxaa kaloo in taa dhaafsiisan in ay warshaduhu ay u baahan yihiin dad dhanlinyaro ah iyo dad aqoon buuxda leh, kuwaas oo maamulikara ama ka shaqeenkara mashiinada, islamarkaana garankara mashiinada casriga cusubi waxa ay u bahanyihiin. Run ahaantii way adagtahay in la saadaaliyo in ay adakaan karaan ama ay fududaan karaan in aad shaqo aad heshid marka aad dhameysi waxbarshada dugsiga farsmada gacanta ama warshadaha. Waxayna ay ku xidhantaha wax barashada aad dooraytay iyo sida uu yahay suuqashaqada markaas,oo ah marka aad dhameysatid wax barashada dugsigasare.